



Car Seats
COLORADO

Tusmada Guud

Sharciyada iyo tilmaamaha kursiga gaariga, kursiga kabista ah iyo suunka amaanka.

**Soomaali
Somali**

❖ Suunka xiro ama waa Ganaax

Darawallada ayaa la joojin karaa lana ganaaxi karaa haddii sarkaal uu arko ilmo aan suunka loo xirin ama si sax ah loogu xirin kursiga. Ganaaxa ugu yar waa \$82 halkii khalad ba.

❖ Kursiga Gadaale ayaa ugu Haboon

Dhammaan ilmaha ka yar 13 sano waa inay fariistaan kursiga danbe waana in si sax ah loogu xiraa suunka amaanka markasta.

Miisaanka/ Dheerarka	Da'da	Kursiga				
			Kuraasta Gaariga ee Gadaal u Jeeda	Kuraasta Gaariga ee Horey u Jeeda	Kuraasta Kabista ah ee Dhabar Sare leh ama aan Dhabarka lahayn	Suumanka Amaanka ee Dhabta iyo Garbaha
			Ilmaha dhashay ilaa kuwa 3 sano jirka ah (Saar kursiga gadaal u jeeda inta ugu badan ee suuragalka ah)	Da'da 2 ilaa 5 sano	Da'da 4 ilaa 12 sano (ama ilaa suunka amaanka kursigu si sax ah u le'ekaanaayo)	Ilmaha ka wayn 9 sano (ilmaha qaarkood, lagama joojinaayo ilaa ay ka gaarayaan 12 sano)
			U adeegso kursiga miisaanka ama dheerarka ugu badan ee shirkada samaysay ku talinayso, oo raac tilmaamaha ku qoran buugga mulkiilaha ee gaarigaaga.			Marka suunka amaanku si sax ah u le'eg yahay.

Tilmaamaha kore ee lagu saleeyay talooyinka NHTSA. Xog dheeri ah ka fiiri CarSeatsColorado.com.

❖ Xasuusinno muhiim ah:

1. Xaqiiji in kursiga gaarigaagu uusan ahayn mid wakhtigiisii dhacay. Muddo ka dib, qoraxda iyo qaboowga ayaa daciifiya qalabka kursiga.
2. Ka fiiri oonlaynka si aad u hubiso haddii kursiga gaariga la amray in dib loogu celsho warshada.
3. Kuraasta gaariga ee soo maray shilka, xataa haddii ay u muuqdaan kuwo badqaba, ayaan ahayn kuwo badqab leh.



COLORADO
Department of Transportation